

Ogoosto 28, 2020-ka

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Agaasimayaasha Hay'adda iyo CDDP: Fadlan farriintan la wadaag shaqaalahaaga:*

Ogoosto 20 [Farriintaydii Agaasimaha](#), waxaan guudmarkii goynta/jarista miisaaniyada la wadaagay Sharci dejinta. Goynta/jaristani ayaa la sameeyay iyada oo sababtu tahay saameynta dhaqaale ee cudurka COVID-19. Iyada oo qayb ka ah ku dhawaaqistani, waxaan la wadaagay in dhaqaalaha loogu talagalay Nidaamyada Isku xira Qoyska ay joojisay Sharci dejintu.

Maanta waxaan rabaa in aan waqti qaato si aan u tilmaamo Nidaamyada Isku xira Qoyska isla markaana sharfo shaqadooda muhiimka ah.

Fikrada Nidaamyada Isku xira Qoysku waxay bilaabantay qiyaastii tobban sano ka hor. Waxay bilaabantay iyada oo ah dhaqdhaqaaq halka hoose ka bilaabmay. Qoysaska dhalay carruurta qabta I/DD ayaa rabay in ay ku xirmaan qoysaska kale. Nidaamyada dhexdooda, ma jiraan nidaamyo adag oo la maraayo. Kaliya qoysas wadaaga waayo-aragnimada nololeed oo midba midka kale taageerayo.

Muddo yar ka dib markii la sameeyay, dadka wax u dooda ayaa helay maalgelinta gobolka. Hadda, Nidaamyada waxay gaaraan 12,000 qoys iyo dadka bulshada u adeega oo ka jira 20 degmo oo ka tirsan Oregon. Guddiga Naafanimada Korriinka ee Oregon (OCDD) ayaa muhiim u ahaa hubinta kobaca iyo guusha Nidaamyada.

Nidaamyadu waxay qoysaska ka caawiyaan in ay diiradda saaraan waxa suurtagalka u ah carruurtooda qabta naafanimada. Waxay isticmaalaan luqad guud iyo sheekooyin shakhsi ahaaneed si ay wax isku baraan. Waxay qoysaska ka caawiyaan horumarinta xirfadaha hoggaamineed iyo ka qayb galinta bulshooyinkooda degaanka.

Waanu taageeri doonaa Nidaamyada inta lagu jiro nidaamkani waxaan rajeynaynaa iskaashi sii socdo oo lala leeyahay dhammaan hoggaamiyayaasha qoyska ee Oregon oo dhan.

Fadlan igala qayb qaato aqoonsiga muhiimada ay leeyihiin isku xirnaanta qoys ilaa qoys kale iyo u mahad celinta Nidaamyada Isku xira Qoyska iyo OCDD ee la xiriira saameynta wanaagsan ee ay ku yeeshen qoysaska, bulshooyinka iyo nidaamka taageero ee Oregon.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka

aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).